

# Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial



Ogeysiisyo: Magac Cusub

Gu'ga 2024

## Xoog-saaridda Yareynta Dhaawaca Shaqada ee Nadiifiyeeyasha (CORE)

Waxaan beddelnay magaceenna! Inkastoo aan ku bilownay “Daraasadda Culeyska Shaqada Nadaafadda ah Dhismayaasha” – wixii hadda ka dambeeya waxaan jeelaan lahayn in aan ku darno nadiifiyeeyasha ganacsiga ee kala duwan iyo baahiyadooda bedqabka iyo caafimaadka shaqada. Waxaan mareegtadeenna ku soo kordhinay xoogaa macluumaad cusub, oo ay ku jiraan sharraxaadda nuqluka hadda la heli karo eegalabka culeyska shaqada xisaaba, iyo yoolasheenna hadda, kuwaas oo ah:

- Ballaarinta qalabka xisaaba culeyska shaqada nadiidiyeeyasha dhismayaasha iyo soosaaridda nuqluka mareegtada ku dhisan ee qalabka.
- Soosaaridda buugga adeegsadaha (Gu'ga 2024).
- Sii-wad sameynta indha-indhaynta goobta shaqada oo faahfaahsan, si aad u ballaarisoo oo aad u safeysa qalabka xisaabinta.
- Qiimeyn ta qalabyada iyo hababka nadiifinta si aan u go'aamino sida ay u saameeyaan halista dhaawaca.
- Sii-wadidda in aan wareysi la yeelanno nadiifiyeeyasha dhismayaasha si aan u aqoonsanno sababaha aasaasiga ah ee keena dhaawacyada iyo jirrooyinka caamka ah.
- Abuurista qalabyada ka hortagga iyo faragelinta si aan gacan uga geysano ilaalinta bedqabka nadiifiyeeyasha dhismayaasha iyo in ay sii shaqeeyaan.

Warar dheeraad ah ayaa ku imaan doonna daabacadaheenna– la soco!

## Khatar Iftiiminta: Kiimiko Wajahid

Bil kasta, waxaan dib-u-eegnaa sheegashooyinka magdhowga shaqaalaha nadiifiya dhismayaasha si loo aqoonsado khataraha caamka ah. Shaqaalaha nadiifiyo dhismayaasha iyo nadiifiyeeyasha waxay si joogto ah shaqada ugu wajahaan khatarro kiimiko oo kala duwan. Dhowaan, dhisme nadiifiyeeyaal badan ayaa ku dhaawacmay ama ku xanuunsaday shaqada iyagoo wax ku cabbay dhallooyin ay kiimikooyin ku jiraan.



Washington State Department of  
Labor & Industries

Si aad macluumaad dheeri ah uga ogaato daraasada,  
wac ama fariin qoraal udir ama iimeel udir SHARP  
360-819-7908 • 1-888-667-4277 • [JanitorStudy@Lni.wa.gov](mailto:JanitorStudy@Lni.wa.gov)  
Nambarka Waxbixinta SHARP: 102-150-2024



Markii ay cilmi-baaristeennu bilaabatay, waxaan sahan gobolka oo dhan ah ku sameynay dhisme nadiifiyeyaasha WA si aan wax uga weyddiinno khatarro ay ka mid yihiin halisaha culeyska shaqada iyo cilmiga nakh-shadeynta iyo habeynta waxyaabaha, wajahidda kiimikada, iyo sidoo kale cunsurrada habeynta shaqooyinka iyo arrimaha bedqabka. Marka la eego 620 jawaab-celin oo dhammeystiran, 35% ee dhisme nadiifiyeyaasha waxay sheegeen in ay nooc cuncun ah kala kulmeen kiimiko wajahid (midkood indhaha, maqaarka, iyo/ama neefsashada).

Xaashideenna talada ee saddexdan bilood waa xusuusinta in aadan **marnaba** kiimikooyin ku shubin caagagga biyaha, koobab, ama weelashada kale ee aan sumadda lahayn. Weelasha kiimikooyinka waa in **mar kastaba si cad loogu calaamadeeyaa** magaca badeecada iyo macluumaadka khatarta.

- Waaxda Caafimaadka iyo Bedqabka Shaqada (DOSH) ee L&I waxay abuurtay **Hagaha Shagaalaha ee Kiimikooyinka Khatarta ah** (oo Af-Ingiriis iyo Af-Isbaanish ah) kaas oo ah il bilaash ah oo bixisa macluumaad ku saabsan kiimiko ku isticmaalidda goobta shaqada, bixisa guudmarka calaamadaha khatarta caamka ah iyo sumadaha khatarta caalamiga ah, wuxuunna bixiyaa jawaabaha su'aalaha caamka ah, liisto-hubineedda bedqabka, iyo macluumaadka xiriirk La&I ee loogu talagalay kuwa doonaya macluumaad iyo caawimaad dheeraad ah.
- Maamulka Caafimaadka iyo Bedqabka Shaqada (OSHA) ayaa sidoo kale abuuray kaararka degdeggaa ah ee calaamadda khatarta caalamiga ah oo loo adeegsan karo in lagu aqoonsado macluumaadka khatarta caamka ah (**Af-Ingiriis** iyo **Af-Isbaanish**).

Sidoo kale ka raadi macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan khataraha kiimikada wargeyska xiga!